

# KIRADAADA MA DAAHDAY?



Haddii mulkiilahaagu uu isku dayayo inuu ku saaro sababtoo ah waxaad dib uga dhacday kirada, weli waxaad haysataa waddooyiin. Haddii aad rabto inaad iska ilaaliso in lagugu khasbo inaad ka guurto gurigaaga, oo sidoo kale loo yaqaan amarka lahaanshaha ama amarka ka saarida, waxaad haysataa laba ikhtiyaar oo waaweyn: "bixi oo joog" ama "guuritaan lagu heshiiyey."

	Amarka lahaanshaha	Bixi oo Joog	Guuritaan lagu heshiiyey
Ma sii joogi karaa gurigeeyga?	Malaha maya	Haa	Maya
Ma lagu qora diiwaankeyga in guriga layga saaray?	Haa	Maya	Maya
Maxkamada ma kuso laabanaa?	Malaha maya	Malaha	Malaha
Intee waqti ayaan haysta oo aan ku guuro?	10 maalmood	Ilaa dhamaadka heshiiskaaga	Ilaa taariikhda aad ku heshiisaan
Gorma ayaa layga rabaa in aan bixiyo lacagta?	Kadib markaad guurto	Taariikhda aad ku heshiisaan	Kadib markaad guurto

## NONPAYMENT FLYER



# Uma baahnid inaad heshiis la gaarto qareenka mulkiilaha gurigaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad tidhaahdo maya oo aad codsato **maxkamad**. Waxaad sidoo kale waydiisan kartaa garsooraha inaad u baahan tahay **wakhti dheeraad** ah ka hor maxkamada. Garsooruhu wuxuu go'aamin karaa inaad sii joogi karin guriga sababtoo ah kirada ayaa dib uga dhacday.

**Laakiin xita haddii ay tahy inaad guurto, weli waad isticmaali kartaa maxkamadeyn si aad u weydiiso garsoraha qaddarka lagugu leyahy.** Garsoruhu qasab ma aha inuu idhaahdo haa laakiin waxaad xaq u leedahay inaad isku daydo. Xataa haddii lagaa badiyo maxkamada, wali waxaad haysataa **10 maalmood** oo aad uga guurto

**Weydiiso inaad "sii waddo" kiiskaaga markaad waddo lacag-bixinta ama guureyso iyo "kuma habboona" kiiska markaad dhammayso.**

Tani waxay ka dhigan tahay inaad haysato hal ama in ka badan oo taariikho maxkamadeed ah halkaas oo aad awoodi doonto inaad ku soo noqoto oo aad tusiso garsooraha in aad lacag ku bixinayso waqtigii loogu talagalay ama aad ka guurtay markii aad tidhi. Marka dhameyso lacag bixinta ama aad ka guurto, kiiska ka saarista ee adiga kugu lidka ah wuxuu noqon doonaa "kuma habboona" ama waa la joojin doonaa.

**Haddii aadan ku raacsanayn qaddarka mulkiilahaagu yidhi waa lagugu leeyahay, ha saxiixin.**

Weydiiso maxkamadeyn oo u sharax garsoorka sababta tirada u khaldan tahay. Xitaa haddii laga badiyo, waxaad weli haysan doontaa 10 maalmood oo aad ka guurto.

Macluumaadka halkan lagu bixiyay maaha oo looguma talagelin inay ka dhigaan talo sharci. Haddii aad qabto dhibaato sharci, fadlan wac qareen gaar ah ama wac Ururka Gargaarka Sharciga ee deegaankaaga ee Tennessee Dhexe iyo xafiiska Cumberlands 1-800-238-1443 ama Ururka Bar Association ee Isbaanishka Nashville 1-615-701-7957. Dib loo eegay 5/23.

